


# Bilow lacag bixinta dhijitaalka ah



Buuga tilmaamaha ee fudud  
oo loogu talagalay iPhone



Länsstyrelserna

# Waayo buug tilmaamaha oo fudud?

Maaddaama oo ay hadda dad badani meel kaligood fadhiyaan, oo ayna leeyiniin fursad xadidan oo ay ku dhex mushaaxaan/wareegayaan bulshada dhexdeeda oo ay dadka kale ula kulmi karaan, ayaa baahida loo qabo in wax lagu bixin karo telefoonka casriga ah ama tablet-ka ay badatay. Qofka aan khibrad u lahayn, oo aan haysan qof la jooga oo ka caawin kara, ayay dabcan ku adkaan kartaa inuu bilaabo. Länsstyrelsen ayaa sidaas darteed soo saartay buug tilmaamaha ee fudud oo loogu talagalay mobilada iyo tablet-ka, ee Android iyo iPhone labadaba, kaas oo la rajeynaayo inuu waxtar yeelan karo.


Buuga tilmaamaha ee fudud ayaa sidoo kale qaraabada iyo shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka taageero u noqon kara.

Tilmaamaha waxa lagu saleeyey telefoonka gacanta ee nooca iPhone ka ah. Waa taas mid la mid ah wax shaqeynaaya xitaa noocyada kale, laakiin waxay u muuqan kartaa mid wax yar uun ka duwan.

## Hordhac


Waayo buug tilmaamaha oo fudud?	2
1. Koonto sameyso, waxa loogu yeero Apple-ID	3
2. La soo deg App-ka bangiga iyo Mobilt BankID	13
3. La soo deg oo ku bixi Swish	26
4. Macluumaadka amniga oo booliska ka socda	37

# 1. Koonto sameyso, waxa loogu yeero Apple-ID




Waxa loo baahan yahay Apple-ID si loola soo degi karro barnaamijyada ("app-ka") sida Internetbank, BankID iyo Swish iyadoo la soo maraayo adeegga App Store ee mobilkaaga ku jira.


1. Riix "Inställningar" si aad u hesho Inställningar (meesha laga wax toosiyo/laga bedelo).



2. Riix "Logga in på iPhone".



Haddii ay koonto ka muuqato xagga kore ayaanad u baahneyn inaad mid cusub sameysato, ee waxaad u gudbi kartaa qeybta 2 ee bogga 13.



3. Riix qoraalka.  
"Miyaanad haysan Apple-ID ama miyaad taas ilowdey?"



4. Riix "Skapa Apple-ID".




5. Gali taariikhda dhalashada. Riix "nästa" markaad dhameeyso.




6. Sheeg magaca hore iyo ka danbe: Ka dibna riix "Nästa".




7. Dooro cinwaan emaylka ee jira ama sameyso cinwaan emayl oo iCloud ah (taas oo lagugula talinaayo).



8. Ku buuxi cinwaanka emaylka aad rabto. Riix "Nästa".




9. Cinwaankan emaylka ayaa noqon doona Apple ID gaaga. Riix "Fortsätt".







10. Xarafka sirta ah laba jeer gali. Riix "nästa" markaad dhameyso.




11. Ku buuxi lambarka moobaylkaaga. Ka dibna riix "Fortsätt".



12. Akhriso shuruudaha.  
Riix "Godkänn".



13. Hal mar oo kale aqbal  
shuruudaha.




14. Hadda waad soo gashay.




15. Gali xarafka sirta ah ee moobaylkaaga.



16. Isku-xir "Slå ihop" xiriirada iyo bogagga internetka ee koontada Apple-ID si loogu sugo haddii ay dhacdo inuu kaa lumo, ama aad beddesho, moobalkaaga.



17. Hadda ayaaa Apple-ID ay dhammaatay. Koontada waxa laga arkayaa inställningar.



## 2. La soo deg App-ka bangiga iyo Mobilt BankID



### **Waxaanu soo qaadi doonaa laba shay**

- A. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso app-ka bangiga 14
- B. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso Mobilt BankID 21

## A. Sida aad ula soo degayso oo aad ugu rakibeyso app-ka bangiga

Bangiyada leh app-ka bangiyada ee moobaylka ee soo saara BankID:


- Danske Bank
- Handelsbanken
- ICA Banken
- Länsförsäkringar Bank
- Nordea
- SEB
- Skandiabanken
- Sparbanken Syd
- Swedbank
- Ålandsbanken

Waxaad app-ka bangiga ka heli kartaa App Store. Bogga soo socda, waxa aanu kuugi sheegi doonaa sida loola soo degayo app-ka bangiga.




# Hoosta waxa talaabo talaabo laguugu tusayaa sida loola soo dego oo loogu rakibeyso app-ka bangiga


1. Riix astaanta "A" oo leh qoraalka "App Store".



2. Ku qor magaca bangigaaga oo ka dibna raadi.




3. Tusaale ahaan: Waxaan dooranayaa bangiga moobaylka ee anigoo safkan riixaaya.







4. Riix "HÄMTA".




5. Ku soo gal bank-ID gaaga.




## 6. Riix "Öppna".




## 7. Riix "Tillåt".



8. Dooro inaad ku soo gasho e-koodhkaaga (kaadh-akhriye) ama koodhka shaqsi ahaaneed.



9. Haddii aad e-koodhka doorato, ku qor lambarkaaga shakhsiga, oo riix "Logga in".




10. Bilow kaadh-akhriyaha adigoo kaarka bangiga gelinaaya. Ka dib raac tilmaamaha oo soo gal.




## B. Sida aad ula soo degayso ee aad ugu rakibeyso Mobilt BankID

Si aad ugu bixiso moobalkaaga ayaad ugu baahan tahay aqoonsi dhijitaal ah, waxa loo yaqaano aqoonsi elektarooniga ah. Waxa maanta jira saddex aqoonsi oo elektaroonik ah oo la ansixiyey: BankID oo ka soo baxa bangiyada, AB Svenska Pass iyo Freja eID+. Ta caadi ahaan ugu badan ee lacag bixintu waa Mobile BankID, taas oo aad bangigaaga internetka ka dalbatid.


Haddii aadan weli bangiyada internetka haysan, waa inaad booqato xafiiska laanta bangigaaga si aad ugu bilowdo. Buuga tilmaamaha ee fudud ayaa caawimo kuu noqon kara markaad guriga joogtid.




1. Riix astaan "A" oo leh qoraalka "App Store".




2. Sanduuqa raadinta ku qor "Mobile BankID".




3. Ka dooro adigoo riixaaya badhanka safka.



4. Riix "Hämta" oo ka dibna riix "Öppna".



5. Soo gal bangigaaga internetka oo dalbo Mobile BankID. Waxay internetka u muuqan kartaa siyaabo kala duduwan, iyadoo ku xiran bangiga aad leedahay. La xiriir bangigaaga haddii aad dhibaato la kulanto. Ka dibna riix "Hämta BankID" adiga moobalkaaga.



6. Ku buuxi lambarkaaga shakhsiga iyo koodhka hawlgalinta/shidista ee bangigaaga internetka SMS kuugu soo siri doono.







7. Dooro koodhka aqoonsiga oo leh ugu yaraan 6 lambar. Waa koodhkan ka aad ka dib u isticmaali doonto si aad aqoonsigaaga ugu muujiso BankID-gaaga.



8. Tijaabi Mobile BankID adigoo riixaaya koodhkaaga. Ka dibna riix "Fortsätt".



### 3. La soo deg oo ku bixi Swish




#### **Waxaanu soo qaadi doonaa**


- |   |    |
|---|----|
| A. La soo deg appka Swish   | 27 |
| B. Ku bixi Swish  | 29 |
| C. Ogowlow lacag bixinta  | 30 |
| D. Ku bixi Swish - qayb dheeri ah   | 31 |
| E. Swish - Taariikh   | 33 |
| F. Inställningar - Favoriter (Kuwa ugu jeceshay),<br>dadka aad inta badan swish wax ugu dirto | 34 |

## A. La soo deg appka Swish


1. Riix astaan "A" oo leh qoraalka "App Store".



2. Sanduuqa raadinta ku qor Swish, riix raadinta marka ay soo muuqato oo appka swish ula soo deg sida lagu tilmaamay.



3. Waa inaad Swish ka ku xidhaa lambar moobayl. Markaad app-ka Swish furto marka ugu horeysay, ayaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida aad sameyn doonto. Talaabada ugu horeysaa waa inaad bangigaaga internetka soo gasho. Waxay bangiga internetku uu u muuqan karaa siyaabo kala duduwan, iyadoo ku xiran bangiga aad leedahay. La xiriir bangigaaga haddii aad dhibaato la kulanto.



## B. Ku bixi Swish

1. Fur app-ka Swish oo riix "Swisha".




2. Ku qor lambar moobayl ama riix calaamada toganaha/isku geynta si aad ugu hesho liiska xiriirkaaga.

Ku buuxi cadadka lacagta ah.


Ku dar fariin (iskaa/ ikhtiyaar ah).

Riix "Swisha". Taas macnaheedu ma aha inay lacagtu tageyso. Tallaabada xigta waxaad ku hubin kartaa inuu qofka loo dirayaa sax yahay.




## C. Ogowow lacag bixinta

1. Hubi macluumaadka Ku saxeex koodhka amniga.




2. Sumadda orgiga iyo xiddig dhacaysa ayaa ku tusaysa in lacag bixinta la sameeyey.




## D. Ku bixi Swish - qayb dheeri ah

1. Riix "Skicka med ett kort".




2. Dooro nooca kaadhka aad rabto inaad ku dirto.



3. Riix astaanta. Kaadhka  
gadaashiisa ayaa lagu  
tusayaa.


Riix "Välj kort".






## E. Swish - Taariikh

1. Riix "Historik" si aad ugu aragto lacagtaadii aad swish ku heshay ama aad ku dirtay.




2. Waxaa "All" hoosteeda ku arkeysaa dhamaan swishka soo galay iyo kuwa ka baxay. Waxa aad sidoo kale riixi kartaa "Mottagna" ama "Skickade".




## F. Inställningar - Favoriter (Kuwa ugu jeceshay), dadka aad inta badan swish wax ugu dirto


1. Riix astaanta inställningar.




2. Riix "Favoriter".




3. Riix " Ny Favoriter".




4. Ku buuxi magacaaga iyo lambarka telefoonka ama riix tabaneha si aad u furto xiriiradaada.



5. Riix "Enter-pilen".



6. Waxa aad kuwaad ugu jeceshay toos uga heli doontaa aragtida lacag bixinta, qeybta qoraalka "Mottagare" hoostiisa.



## 4. Macluumaadka amniga oo booliska ka socda

### Waxyaalaha u baahan in laga fikiro:

- Waligaa ha isticmaalin aalada bangiga ama BankID marka uu qof kula soo xiriiray kaa codsado.
- Waligeed ayaan cid daacad ahi telefoonka kugu weydiisan doona inaad BankID siiso. Ma aha bangiga, ma ahan booliska, ma ahan boostada.
- Waligeed ayaan cid daacad ahi emayl ahaan kugu weydiisan doona xarafka sirta. Ma aha bangiga, ma ahan booliska, ma ahan Microsoft ma ahan Google.
- Khayaanada telefoonka la iska soo wacaayo ayaa aad u sii kordheysa.
- Dad badan ayaa lacagtooda ku waaya iyadoo la khiyaameeyay oo ay macluumaadka kaararka iyo koodhka dhiiba ama bangigooda soo gala.
- Farriin digniin ah oo ku saabsan khiyaano ayaa lagu tusayaa app-ka isticmaalaha, haddii ay socdaan dhowr iskuday soo galitaano isku mar dhacayaa. Markaa ka dib la xiriir bangigaaga isla markaaba.



## La xiriir Länsstyrelsen Skåne:

Catharina Hellström Engström, telefon 010-224 13 72  
[catharina.hellstrom.engstrom@lansstyrelsen.se](mailto:catharina.hellstrom.engstrom@lansstyrelsen.se)

Lisbet Smolka Ringborg, telefon 010-224 16 36  
[lisbet.smolka-ringborg@lansstyrelsen.se](mailto:lisbet.smolka-ringborg@lansstyrelsen.se)

**Wax dheeraad ah ka akhri bogga:**

[www.lansstyrelsen.se/skane/betaltjanster](http://www.lansstyrelsen.se/skane/betaltjanster)

*Enkel manual för Iphone på somaliska*

Waxa la diyaariyey ka dib wadashaqeyn lala sameeyey Länsstyrelserna:  
Sawir: Sawirada ugu badan



---

Länsstyrelserna

---